Alberta

**War** saxaafadeed

# Alberta waxay u yeeraysaa farsamoyaqaanada xirfadda leh.

Maajo 01, 2024 Weydiimaha warbaahinta (Media inquiries)

## Alberta waxay u yeeraysaa farsamoyaqaanada xirfadda leh inay gacan ka geystaan buuxinta doorarka muhiimka ah ee suuqa shaqada ee Alberta.

Alberta ayaa weli ah hormuudka Kanada ee maalgashiga iyo shaqo abuurka. Shaqaalaha Alberta ayaa weli haysta dakhliga ugu sarreeya toddobaadlaha ah ee gobollada, maalgashiga qofkiiba waa kan ugu sarreeya Kanada, GDP-ga dhabta ah ayaa la filayaa inuu dhaafo celceliska qaranka 2.9 boqolkiiba sanadkan - kuwaas oo dhammaantood gacan ka geysanaya kor u qaadidda kobaca shaqada. Maadaama shaqooyin badan la abuurayo, shirkaduhu waxay u baahan yihiin shaqaale xirfad badan si ay u sii wadaan.

Si gacan looga geysto buuxinta boosaska muhiimka ah ee farasmada xirfadaha, Dowladda Alberta waxay bilawday wejigii saddexaad ee ololaha Alberta Ayaa Idin Yeeraysa, kaas oo hadda ka jira suuqyada British Columbia, Quebec iyo Ontario. Ololahan waxaa taageeray Gunnada Dib udejinta Alberta oo hal mar, $ 5,000 doolar faa'ido canshuur celin ah oo loogu talagalay in lagu dhiirrigeliyo shaqaale xirfad leh inay yimaadaan Alberta si ay gacan uga geystaan dhismaha guryaha iyo kaabayaasha loo baahan yahay si loo taageero gobolka soo koraya.

"Kobaca dhaqaale ee Alberta wuxuu soo bandhigayaa fursado badan oo loogu talagalay shaqaale xirfad leh oo ka kala yimid dalka oo dhan. Ololaha Alberta Ayaa Idin Yeeraysa iyo Gunnada Dib udejinta Alberta waxay dib u xaqiijinaysaa sida ay uga go'an tahay dawladdayada inay soo jiidato tayada sare iyo wax ka qabashada baahiyaha xoogga shaqaalaha ee qaybaha muhiimka u ah sii wadida barwaaqada gobolkayaga. Waxa kale oo ay muujinaysaa inay dhab naga tahay buuxinta shaqooyinka wax soo saarka leh shaqaale wax soo saar leh si ay u taageeraan baahiyaheena ee ah ballaarinta kaabayaasha."

*Matt Jones, Wasiirka Wasaaradda Shaqada, Dhaqaalaha iyo Xirfadaha*

Waaxyaha dhismaha ee bulshada ah iyo kuwa aan bulshada aan ahayn ee gobolka ayaa la filayaa inay marag u noqdaan kobac joogto ah tobanka sano ee soo socda. Saadaasha dhow ee AwoodDhiska Kanada (BuildForce Canada) waxay rajaynaysaa wadarta guud ee shaqada ee qaybta dhismaha ee Alberta inay kordho 14,000 kale oo shaqaale ah inta u dhaxaysa 2024 iyo

2033. Iyada oo ay kor u kacday bilawga guriyeynta iyo maalgashiga balaayiin doolar ah ee gobolka, sida mashruuca Dow Path2Zero ee Fort Saskatchewan, baahida loo qabo shaqaalaha xirfadaha leh kama weynayn sidan weligeedba.

Ololuhu waxa uu iftiimin doonaa faa'iidooyinka shaqo iyo hab nololeed ee badan ee ku noolaanshaha Alberta, oo ay ku jiraan suuqa shaqada oo kobcaya, mushaharka badan, cashuuraha yar ee Kanada, guryo la awoodi karo iyo bulshooyin kala duwan.

"Alberta Ayaa Idin Yeeraysa ee Wajiga 3aad waa hadal soo jiidasho leh oo ku saabsan muhiimada ay shaqaale xirfad leh u leeyihiin dhaqaalaha Alberta iyo mustaqbalkayaga, waxaan u baahanahay iyaga! waa faa'iido la taaban karo oo macno leh taasoo dhiirigelin doonta shaqaale xirfad leh Si ay u gaaraan go'aanka ugu fiican ee ay ku yimaadaan Alberta.

*Rajan Sawhney, Wasiirka Waxbarashada Sare*

"Xirfadlayaasha farasmada leh ee Alberta waxay bixiyaan fursado shaqo oo badan oo muhiim ah. Gobolkayaga wuxuu ku dhow yahay inuu la kulmo kor u kac weyn oo xagga shaqada ah iyada oo loo marayo mashaariicda sida Alaabada Hawada iyo Dow. Haddii aad raadinayso gobol qurux badan oo aan shaqo yaraan lahayn, wakhtiagan ayaa ah xiligga aad imaan laheyd Alberta."

*Terry Parker, Agaasimaha Fulinta, Dhismaha Xirfadaha Alberta*

Miisaaniyada 2024 waxa ay u qoondaysay $10 milyan doolar ee Alberta Ayaa Idin Yeeraysa iyo Gunnada Dib udejinta. Tani waxay taageeri doontaa 2,000 oo shaqaale ganacsi ah si ay ugu soo guuraan Alberta oo ay ogaadaan sababta ay u tahay meesha ugu fiican ee lagu noolaado, laga shaqeeyo, la maalgashado oo qoys lagu koriyo. Shuruudaha u qalmitaanka ayaa laga heli karaa bogga khadka internetka ee Alberta is Calling.

## Xaqiiqooyin degdeg ah

- Bishii Agoosto 2022, dawladda Alberta waxay bilawday ololaha Alberta Ayaa Idin Yeeraysa si ay uga caawiso wax ka qabashada shaqo yaraanta.

  - Wajiga 1aad, kaas oo la hawl galiyay Agoosto 2022, wuxuu diirada saaray soo jiidashada shaqaalaha xirfada leh ee daryeelka caafimaadka, farsamoyaqaanada iyo qaybaha tignoolajiyada Toronto iyo Vancouver.
  - Wajiga 2aad, oo la hawl galiyay bishii Maarso 2023, ayaa lagu beegsaday deegaano ku yaala Ontaariyo iyo Atlantik Canada oo ay ka jiraan heerarka shaqo la'aanta ugu badan.
  - Wajiga 3aad, kaas oo socon doona Maajo 1eeda ilaa Luuliyo 2eeda, 2024, waxa uu diirada saarayaa shaqaalaha xirfada leh ee ku sugan British Columbia, Quebec iyo Ontario. Marxaladani waxa ay ahaan doontaa mid aad u yar baaxad ahaan waxaana loo

isticmaali doonaa in lagu suuq geeyo Gunnada Dib udejinta ee farsamoyaqaanada xirfadleyda ah.

- Wajiga 3aad ee ololaha waxa ku jira xayaysiisyada xarumaha Waxbarashada sare, makhaayadaha, baararka iyo goobaha jimicsiga; raadiyaha, baahinta iyo xayeysiinta warbaahinta bulshada; iyo bogga AlbertaisCalling.ca oo la cusboonaysiiyay.
- Wajiga 3aad ee ololaha waxa la filayaa in uu ku baxdo ku dhawaad $2.5 milyan doolar

## Xogaha la xiriira

- Alberta Ayaa Idin Yeeraysa (Alberta is Calling)

## Weydiimaha warbaahinta

### Josh Aldrich

587-338-7509
Xoghayaha Warfaafinta, Shaqooyinka, Dhaqaalaha iyo Xirfadaha

Classification: Public